



CCS ELEVATE

MOLER ELEMENTARY

Bishii Noofeembar 2023, waxaa mahad leh iyada oo ay ugu wacan tahay taageerada baaxadda leh ee codbixiyaasha Columbus, Dugsiyada Magaalada Columbus waxa ay meel mariyeeen \$100-milyan oo canshuur ah oo ay ku ballan qaadeen in ay kor ugu qaadayaan xarumahooda ayna yarey-nayaan raad-raad-raacooda. Hadafka waa in la taageero hiigsiga degmada ee ah bixinta waxbarasho tayo sare leh ee dhammaan ardayda. Siyaasadda Guddiga (Per Board Policy) 7105, Kormeeraha Guud wuxuu abuuray Guiddi Hawleedka Xarumaha Bulshada horaantii Febraayo 2024 si ay u qiimeeyaan dib-u-habeynta xarumaha degmada. Kooxdan hawshani waxay ka kooban yihiin shakhsiyad leh asal iyo waayo-aragnimo kala duwan.



Guddi-hawleedku waxay u soo jeediyeen talooyinka ugu horreeya ee Guiddida Waxbarashada Talaadadii 7-da Maajo. Talooyinku waxay diiradda saareen waxay jaan-goyn doontaa kooxaha muusikada ee dhismayaasha, kor-dhinta galaan-galka tacliimeed iyo wax-qabadyada manhajka ka baxsan, bixinta adeegyo loo siman yahay ee qoysaska iyo ardaydaba, iyo xur-maynta maal-galinta cashuur bixiyeyaashii hore. Hadafka ayaa ah in si wanaagsan loo fahmo aragtida bulshada ee talooyinka bilowga ah iyo kor u-qaadida wadashaqeynta iyada oo loo marayo wada hadal furan. Tani waxay gacan ka geysan doontaa in la waafajiyo qorshaha guud ee xarumaha iyo hiigsiga degmada iyo kor u-qaadida fahanka Dugsiyada Magaalada Columbus.



Kooxda Hawl-wadeenada Xarumaha Bulshada ee Kormeeraha Guud waxa ay ku talinayaan in Guiddida Waxbarashadu xiro **Dugsiga Hoose ee Moler Elementary School**, kaas oo hadda noqon doona qayb ka mid ah bulshooyinka dugsiga Lincoln Park iyo Dugsiga Livingston Elementary School.

Dugsiga Hoose ee Moler Elementary School (1967) wuxuu u adeegi karaa 475 arday; si kastaba ha ahaatee, laga bilaabo sanad-dugsiyedka 2023-2024, 298 arday oo kaliya ayaa iska diiwaan-gelisay, iyada oo heerka adeegsiga hadda uu yahay 60%.

Dugsiga Moler wuxuu ku yaallaa dhanka koonfureed (south side) ee magaalada. Inta lagu guda jiro Shaqada Qorshaha Guud ee Xarumaha (Facilities Master Plan), dugsi kasta oo xaafadeed - Lincoln Park iyo Livingston - wuxuu helay cusboonaysiinta dhismaha qarniga 21-aad. Ka soo guurista ardayda Dugsiga Moler ee usoo rarida labadan dugsi waxay jaan-goyn doontaa kooxaha muusikada fasallada dugsiyada hoose (PreK-ilaa 5-aad) iyo ardayda dugsiga dhexe fasallada (6-aad ilaa 8-aad). Ardayda fasalka lixaad waxay u gudbi doonaan Koonfurta fasallada 6-aad ilaa 12-aad, iyaga oo siinaya waayo-aragnimada dugsiga dhexe ee caadiga ah iyo waqt-waxbarasho dheeraad ah.